

SU'AALAH A INTA BADAN LA ISKA WEEYDIYO ee ugu Sareeyo Tallaalka COVID-19

Tallaalada ayaa ah hormarka kaliya ee cilmi seyniska ee leh isku celceliska muddada noolaansha ee aad ugu dheer. Tallaalka ayaa ah habka kaliya ee lagu soo afjari karo safmarkaan oo loogu laaban karo noolasheena caadiga ah.

Ku ilaali nafsadaada, kuwa aad jeceshay, iyo bulshadaada inaad tallaalka qaadato.

Maxaan isku tallaalayaa?

Caabuqa COVID-19 wuxuu dhimasho u sababi karaa dadka caafimaadka qaba iyo kuwa xanuunsan ee da' kasta leh.

Xitaa haddii uusan qofka u dhimanin COVID-19, wuxuu yeelan karaa dhibaatooyin raaga sida xusuus beel, daal, neefsashada oo adkaata sabab la'aan, iyo waxyeelada wadnaha ama sambabka. Xarumo caafimaad ayaa la diyaariyay si loogu taageero bukaanada faraha badan ee COVID-19 kuwaas, inkastoo aysan cudurka sii qabin, aanan ku laaban karin shaqada ama ku noolaan karin nolal caadi ah.

Sidee ayuu u shaqeeyaa tallaalka?

Tallaalka wuxuu baraa difaaca jirkeena sida loola dagaalo fayraska oo looga hortago inaan jirano haddii aan u beylah noqono COVID-19. Tallaalka kuguma ridi karo COVID-19.

Waa maxay difaaca cudurka oo muxuu muhiim u yahay?

Haddii ay dad ku filan leeyihiin dicaaf, fayraska uma badna inuu faafo. Waxaan u baahannahay inaan tallaalka siino 70-80% tirada dadka si aan u helno ilaalada cudurka dadban ee lagu helo dadka badankiisa oo tallaalan oo aan dib ugu laabano noolal maalimeedkeena, ugu furno ganacsiyada, laabta u galino una kulano kuwa aan jecelnahay.

Horay ayuu iigu dhacay COVID-19. Weli ma sii qaataa tallaalka?

Xitaa haddii uu horay kuugu soo dhacay COVID-19, lama hubo ilaa iyo inta difaaca sii jirayo. Waxaa suurtoagal ah inuu markale kugu dhaco COVID-19. Waa inaad weli qaadato tallaalka si aad u ilaalso nafsadaada iyo dadka kale.

Miyaan weli u baahannahay inaan xirto maaskaro oo aan ka fogaado kadib marka istallaalo?

Haa. Waxaa weli muhiim ah in lagu dhaqmo tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha ilaa inta badandadka laga tallaalo.

Ilaa iyo intee ayay qaadaneysaa inaan difaac yeesho kadib marka qaato tallaalka?

Waxay ku qaadataa jirka 2 toddobaad ka dib kuuraha labaad si uu u yeesho awood difaac tallaalka ka gadaal. Qof ayaa laga yaabaa inuu qaaday fayraska wax yar kahor inta uusan qaadanin tallaalka ama wax yar kadib markuu qaato oo uu xanuunsado, sababta oo ah tallaalka ma uusan yeelanin waqti ku filan oo u jirkiisa difaac ugu yeelo.

Tallaalka malala soo degdegay?

Wax tallaabooyin ah oo laga booday ma jiraan, dhammaan habraacyada badqabkana waa la raacay. Tallaalka waxaa degdeg loogu sameeyay sababtoo ah hormarka laga saameeyay tignoolojiyada iyo sababtoo ah ansixinta aan qeybaha caafimaadka ahayn (habraacyada xafiiseed iyo shabadeynta dukumiintiyada) ayaa kowdii la dabagalay.

Ma jiraan waxyeelooyin?

Waxaa jiri karo inuu yeesho saameynada caafimaadka tallaalka COVID-19, balse waa kuwa fudud oo ku dhamaado maalmo yar. Saameynada caafimaadka ugu badan waa murqo xanuun, madax xanuun, iyo qandho/qarqaryo

Waxaa lagaa kormeerayaa falcelinta walboo xasaasiyad imaan karta tallaalka kadib.

Tallaalka badqab ma yahay?

Tallaalka waa badqab. Waxaa aad u badqad ah in la is tallaalo intii uu cudurka kugu dhici lahaa oo aad si la fillaan ah ula dhibaatoovid saameynada caafimaadka muddada dheer. Malaayiin qof oo reer Kanada ah ayaa kolhoreba qaatay tallaalka waxaana caddaatay in tallaalada ay badqab yihiin. Tallaalka waxba kama baddeli karo DNA-gaaga.

Haddii aad horay u yeelatay falcelinta xasaasiyado daran, aad leedahay difaaca jirka oo daciifay, ama aad uur leedahay, arag dhakhtarkaaga ka hor inta aadaan qaadanin tallaalka.



Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan fursadaha lagu taageerayo 19toZero, fadlan la xiriir: info@19tozero.ca
Wixii warbixinta ugu dambeysay ah ee ku saabsan tallaalka, booqo: canada.ca/covidvaccine